



WAALIDIIN FIRDIRCOONI UGA QAYBGALA LA QABSIGA

Ka hor intaan la billaabin:

- Ilmaha iyo waalidka ayaa lagu casumayaa inay yimaadaan xannaanada carruurta.
- Waalidka ayaa la waraysanayaa.
- Waalidka ayaa lala shirayaa.

Maalmaha la qabsiga ee ay waalidiintu goobta joogayaan

Maalmaha 1-aad iyo 2-aad:

- Waalidku ilmahooda ayay la joogayaan maalinta oo dhan, ayaga ayaana wax walba mas'uul ka ah.
- Dadka xiriiriyayaasha ah ayaa la joogaya ilmaha iyo waalidka.

Maalinta 3-aad:

- Waalidku weli ilmahooda mar walba way la joogayaan.
- Haddii uu ilmaha raali ka yahay, qofka xiriiriyaha ah ayaa la wareegaya qaar ka mida mas'uuliyadda daryeelka ilmaha, waalidka oo jooga.

Maalinta 4-aad:

- Waalidku maalinta oo dhan kama fogaanayaan ilmahooda, laakiin waxay isu badin karaan inay waxoogaa ka durugsanyihiin .
- Waalidku way ka bixi karaan qaybta kolka uu ilmuhu hurdo
- Dadka xiriiriyayaasha ah ayaa maalinta ilmaha iska saaraya mas'uuliyad dheeri ah.

Maalinta 5-aad:

- Waalidku waqtiga intiisa badan kama fogaanayaan ilmahooda, laakiin waa inay waxoogaa ka durugsanyihiin.
- Waalidku way ka bixi karaan qaybta kolka uu ilmuhu hurdo
- Haddii uu ilmuhu raali ka yahay, waalidku gelinka danbe cabbaar yar way ka bixi karaan qaybta.
- Qofka xiriiriyaha ah ayaa caadiyan la wareegaya mas'uuliyadda guud ee ilmaha.

Toddobaadyada ka danbeeya la qabsiga waxaa lagu talinayaa:

Marka ugu horaysa ee aanu waalid- ku goobjoog ahayn:

- Maalmo gaagaaban, haddii ay suurobayso
- Gelin danbeedyo xasilloon, xannaanada carruurta iyo guriga labadabala).